

**DUQA LONDON &
GUDIDA LONDON EE
DOORASHADA**

**6-da MAAAY
2021**

**Ku qoro xusuus qorkaaga.
Markale.**

London waxya codaynaysaa 6-da Maay 2021.
Ka oggaw sida aad uga qayb galayso
londonelects.org.uk

Aragtidaada ka dhiibo.

**LONDON
ELECTS**

6-da Maay 2021, dadka degan London waxay u codayn akraan Duqa London iyo 25 Xubnood ee Gudida London.

Shaqada Duqa waxa waaye inuu London ka dhago meel dhaanta oo qof kastaa oo soo booqanaya loogu talo galay, degan ama ka shaqeeya magaalada.

Waxaa taas kamid ah diyaarinta siyaasadaha, dejinta miisaaniyada, kormeerka barnaamijyada waawayn iyo in heer la gaarsiiyo London caalamka oo dhan - dhamaan iyada oo waafaqsan himilada Duqa iyo rabitaanka London iyo dadka reer London.

Gudida London waxa ay ka kooban yihiin 25 Xubnood - 11 waxay matalaan caasimada oo dhan oo 14 waxaa doorta degmooyinka London.

Sharciga gudida oo ah indhaha iyo dhagaha Dawlada Hoose ee Reer London. Xubnaha ayaa la xisaabtamaha Duqa iyada oo naqdiya khidadaha Duqa, go'aamada iyo fikiradiisa si ay u xaqiijiyaan in danaha dadka la raaco.

GOORTA LA CODAYNAYO

6-da Maay 2021, goobaha codaynta waxay furnaan doonaan 7da subaxnimo – 10ka habeenimo. Waa inaad wakhti fiican samaysaa oo aad ku codayso.

Hadii aad ku codaynayso boosta, waxa aad heli doontaa warqada codaynta oo warqad ah doorashada kahor. Waa inaad xaqiijisaa in aad soo celiso ugu danbayn 10ka habeenimo 6-da Maay 2021.

YAA CODAYN KARA

Waad codayn kartaa hadii:

- aad tahay 18 ama ka wayn tahay marka la gaadho 6-da Maay 2021
- oo haysato dhalashada Ingiriiska, EU ama u qalanto dhalashada Commonwealth oo aad degan tahay London
- isku duwaan geli codaynta ugu danbayn 19-ka Abriil 2021

Waxaad isku duwaan gelin kartaa inaad codayso www.gov.uk/register-to-vote ama la xiriir golaha deegaankaaga.

HALKEE LAGA CODAYNAYAA

Waxaa jira 3 dariiqo oo aad ku codayn karto.



1 Goobta codaynta:

- Wixii ka horeeya 6-da Maay waxa aan soo diri doonnaa 'kaarka cod bixinta' oo uu ku yaalo faahfaahinta goobta codaynta.
- Waxa aad kaliya ka codayn kartaa xarunta codaynta ee ku qoran kaadhkaaga.
- Shaqaalaha xarunta codaynta ayaa kaa caawin kara inaad fahanto waraaqahaaga codaynta hadii aad u baahato.
- Khasab maaha inaad qaadata kaadhka codaynta marka aad xarunta codaynta tagayso laakiin waxa uu caawinayaa shaqaalaha.

Waxa laga filan karo xarunta codaynta:

Xarunta codaynta waxa waaye meel amaan ah si loogu codeeyo 6-da Maay. Haku codayn xarunta codaynta hadii aad xanuunsanayso. Waa tan waxa aad samayn karto si adiga iyo dadka kale ay u amaan qabaan:

- xidho waji gashad iyada oo lagaa dhaafo moojee
- farxalo - gacmo nadiifiye hadii aad haleyso
- ilaali kala fogaanshaha iyo jihada kaliya ee loo socdo
- soo qaado qalinkaaga ama qalin beensalkaaga

Wixii macluumaad ugu danbeeya ee ah COVID-19 iyo doorashada, booqo websaydka Doorashada London ee www.londonelects.org.uk/ Covid

Hadii aanad aadi karin xarunta codaynta adiga oo socda, waxa aad dalban kartaa in aad ku codeeyso boostada ama wakiil.



2 Boostada:

- Waraaqahaaga codaynta waa lagu soo diri doonaa ilaa todobaad kahor maalinta codaynta.
- Codee oo soo dib noogu soo dir si markaa ay noosoo gaarii karto wixii ka horeeya 10ka habeenimo 6-da Maay 2021.
- Waa inaad xasuusataa inaad buuxiso bayaanka amaanka oo aad saxeexa iyo taariikhda dhalashadana ku dhigto.
- Hadii codkaagu aanu nasoo gaarin wakhtiga ay furan tahay, lama tirin doono.
- Hadii aad ilawday inaad boosta kusoo dirto, waxa aad gayn kartaa warqaadaha codaynta ee aad buuxisay xarunta codaynta iyada oo ku jirta bushqada lagu soo raaciyay.

Waqtiga kama dambaysta ah ee arjiga codaynta boostada ee cusub iyo isbadalka boostada hore ama codaynta wakiilka waxaa weeye 5 galabnimo 20-ka Abriil 2021.



3 Isticmaal borooskiga:

- Haddii aad tegi kari waydo xarunta codaynta waxa aad ka dalban kartaa qof aad ku kalsoon tahay inuu borooksi kuu sameeyo.
- Tani waxay ka dhigan tahay inuu adiga kuusoo codaynayo laakiin waa inaad u sheegtaa cida aad doonayso inaad u codayso.

Mudada ay ku eegtahay arjiyahada cusub ee ku codaynta borooksi (aan ahayn borooksiga boosta ama borooksiyada xaalada degdega ah) waxaa weeye 5ta galabnimo 27-ka Abriil 2021.

Mudada uu ku eeg yahay arjiyada borooksiga xaalada degdeg ah waxaa weeye 5 galabnimo 6-da Maay 2021.

Macluumaad badan ka oggow londonelects.org.uk

@LondonElects


#LondonVotes

SIDA LOO CODAYNAYO

Waxaa lagu siin doonaa 3 waraaqadood oo cayn ah si aad ugu codayso:


Duqa London (warqada soosaliga ah ee codaynta):

- Waxa aad leedahay 2 ikhtiyaar oo Duqa London ah.
- Ku qor [X] doorashaada kowaad Qaybta A.
- Ku qor [X] doorashaada labaad oo ka gedisan Qaybta B.
- Waa inaad doorashada kowaad samaysaa ama codkaaga lama tirin doono.
- Cod kastaa waa inuu musharax gaar ah leeyahay.




Xubinta Gudida London ee Degmada (warqada huruudaha ah ee codaynta):

- Doorro cida aad doonayso inuu matalo aagaaga deegaanka ee Gudida London.
- U codee kaliya hal musharax.
- Ku garab qor [X] cida aad dooratay agteeda.



Xubinta Gudida London oo dhan (warqada liimiga ah ee codaynta):

- Cida aad doonayso inay ku matasho London oo dhan Gudida London.
- Mar kaliya codee.
- Ku garab qor [X] cida aad dooratay agteeda.



MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Abriil 2021, qof kasta oo u duwaan gashan inuu ka codeeyo London waxa uu heli doonaa waraaqaha doorashada. Waxaa ku qornaan doona musharixiinta Gudida London, oo ay ku jiraan bandhigyo badan oo musharixiinta Duqa ee doortay mid oo bixiya macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan meesha laga codaynayo iyo sida loo codaynayo. Ka fiiri marka aad albaabka kasoo galayso.

Hadii aad qabto wax su'aalo ah fadlan la xidhiidh:
info@londonelects.org.uk

Wixii macluumaad ugu danbeeya ah ee COVID-19 iyo doorashada, booqo websaydka Doorashada London ee www.londonelects.org.uk/Covid